# Sida loo Diyaariyo Dhagaysigaaga Shaqo la'aanta

In kooban oo ah sida loo Diyaariyo oo loo soo Bandhigo Kiiskaaga

Waaxda Aminiga Shaqaalaynta (ESD) waxa uu ku wargelin doonaa Xafiiska Dhagaysiga Maamul (OAH) marka rafcaanka la soo gudbinayo. Rafcaanka waxa go'aamin doona Garsoore Maamul Sharciyeed oo madax banaan oo aan eexasho lahayn (Garsoore) oo ka socda OAH.

Dhagaysigaagu waxaa lagu qaban doonaa telefoonka. Raac tilmaamaha ku yaala Ogaysiiska Dhagaysiga ee raacdan si aad uga qayb gasho dhagaysiga.

ESD waxay u diri doontaa OAH warqaddaha aad siiso ESD. OAH waxay diyaar garayn doontaa xidhmada dhagaysiga oo waxay u diri doontaa warqaddaha dhammaan kooxaha ka hor dhagaysiga.

Haddii aad naafo tahay waxay taasi ka dhigi doontaa ka qayb galka telefoon ahaan mid aad u adag, waxaad la xidhiidhi doontaa xafiiska ku qoran Ogaysiiska raacsan ee dhagaysiga si aad u codsato hoy.

**Si aad u aragto fiidyow tusaale dhagaysiga ah booqo bogga internetkayaga www.oah.wa.gov**

**Waxaa lagu bixiyaa Af Ingiriisi iyo Isbaanish**

## I. Sida loo Diyaariyo Dhagaysigaaga

- Si feejigan u akhri dhammaan warqaddaha aad ka hesho Ogaysiiska Dhagaysiga.
- U diyaar ahow si aad uga hadasho xaqiiqooyinka muhiimka ah–qor iyagga si ay kaaga caawiyaan in aad xusuusato.
- Haddii aad hayso warqaddo dheeraad ah oo aad rabto in uu Garsoorahu arko, waa in aad si degdeg ah ugu dirtaa Garsooraha iyo dhammaan kooxaha kale ee ku qoran Ogaysiiska Dhegaysiga si aad wakhti ugu ogolaato wakhti dib loogu eego ka hor maalinta dhegaysiga. Ha sugin ilaa miridhka u dambeeya si aad u gudbiso warqaddahaaga.
- Fadlan ka saar wax xog qarsoodi ah (sida lambarada Amniga Bulshadda, lambaradda kootadda bangiga,lambaradda ruqsadda darawalnimada, iwm),
- Waxaad codsan kartaa turjubaan ka hor dhegaysiga haddii Af Ingiriisigaagu uu xaddidanyahay ama haddii aad u baahantahay hoyga naafada. Fadlan wac lambarka telefoonka ee ku qoran Ogaysiiska Dhegaysiga si aad codsi u samayso.
- Dib u dhiga si dhif ah baa loo bixiyaa. Haddii khilaaf kaa haysto taariikhda ama wakhtiga dhegaysiga, fadlan isku day in aad jadwal dib ugu samayso arrinta ka hor intaanad waydiin dib u dhiga. Haddii aad u baahantahay dib u dhig, u diyaar garow in aad sharaxdo sababta. Dhegaysiga sharaxaaga ka dib, OAH waxay mid uun ku siin doontaa ama diidi doontaa codsiga.
- Dadku inta badan iyagaa iska wakiila dhegaysiga shaqo la'aanta. Waxaad dooran kartaa in lagaa wakiil noqdo dhagaysiga. Haddii aad shaqaalaysiiso qareen, waxaad masuul ka ahaan doontaa in aad bixiso wixii kharash qareenka ah. Si kastaba ha ahaatee, www.oah.wa.gov/Unemployment.shtm ( kiisku xasaasiyahay) waxa uu qoraa ilaha kharashkoodu hooseeyo ama wakiilnimo aan kharash lahayn.

- Haddii aad qorshayso in aad wacdo markhaati dhagaysiga, waxaad u baahantahay in aad hubsato xogta ku saabsan marka dhegaysiga la qaban doono ama sida loo waco.

## II. Maxaa dhacaya Dhagaysiga?

Garsoorahu waxa uu duubi doonaa dhegaysiga. Garsoorahu waxa uu sharaxi doonaa arrimaha oo waxa uu faahfaahin doonaa waxa dhacaya muddada dhegaysiga. Garsoorahu markhaatiga wuu dhaarin doonaa. Aqoonsan doonaa oo qiri doonaawax la soo bandhigo, waydiin doonaa markhaatiga oo maraga aya qaadi. Dhagaysigu caadi ahaan waa uu ku dhammaadaa 45 iyo 60 miridh. Garsoorahu waxa uu gaadhi doonaa go'aan ku salaysan caddaynta la soo bandhigay oo waxa uu boostada ugu soo diri doonaa go'aan qoran kooxaha toddoba maalmood gudahood. Go'aanka garsooraha waxaa loo tixraacaa sidii Amarka Hore.

Haddii aad tahay (codsadaha) ha soo wacin dhagaysiga aad codsatay, Garsoorahu waxa uu geli doonaa habka qof aanu soo xaadirin oo taa macnaheedu waxa weeye rafcaankaagu waxa uu ku baaqi ahaan doonaa mid saamayn leh.

Haddii aad khilaafto go'aanka qoran ee garsooraha, waxaad rafcaan ka qaadan kartaa adoo soo gudbinaaya Codsiga Dib u eegida. Dhammaadka go'aanka Garsooraha waxaa jiri doonaa tilmaamo gaar ah oo ku saabsan sida loo soo gudbiyo Codsiga Dib u eegida iyo taariikhda lagu wado in ay dhaco Codsiga Dib u eegidu.

Haddii aad xiiso u hayso samaynta cilmi baadhis sharciyada ah oo ku habboon kiiskaaga Xeerka Washington ee Wax laga Beddelay (RCW) iyo Xeerka Maamul ee Washington (WAC) waxaa laga heli karaa www.oah.wa.gov/LegalResearch.shtml.

**Ka eeg su'aalaha inta badan la iswaydiiyo boggan www.oah.wa.gov**

- Waa maxay sababta wanaagsan ee ka tegistu?
- Waa maxay dhaqan xumaddu?
- Ka waran haddii aan leeyahay baahiyaha gaarka ah?
- Ka waran haddaan u baahanahay turjubaan?
- Tilmaamaha caawinta dhegaysiga
- Xidhitaanka xafiiska

Haddii aanad ku lahayn gelitaan internatka ah guriga, waxaad codsan kartaa nuqul xogta ah taas oo lagu bixiyo toos internatka addoo wacaya xafiiska ku qoran Ogaysiiska raacsan Dhagaysiga. Sidoo kale waxaad habbayn kartaa in aad isticmaasho kombuyuutar ama Xarunta Isha Shaqada.

## III. Ilaha Sharciga ee Wakiilnimada

Waxaad la tashan kartaa kuwa ssoo socda wixii caawimos harci ah:

| Magaca Isha | Telefoonka | Barta Internatka |
|---|---|---|
| Sharciga mashruuca shaqo la'aanta (Unemployment Law Project) | 888-441-9178 | www.unemploymentlawproject.org |
| Ururka Wakiiladda Qareenada ee Washington | 800-945-9722 | www.wsba.org |
| CLEAR | 888-201-1014 | www.washingtonlawhelp.org |